
Helsedirektoratet    Statens legemiddelverk    DSA Direktoratet for strålevern og atomsikkerhet

# Kaliumjodid SERB




## Cunista kaniiniyada iodine haddii uu dhaco shil hubka nukleerka ah

Ma tahay qof ka yar 40 sano jir, uur leh, naas nuujinaysa ama carruur guriga u joogaan? Haddii ay sidaas tahay, waxaan ku talinaynaa inaad guriga dhigato kaniiniyada iodine ka. Kaniiniyadaan waxay kaa difaaci karaan sunta maadada iodine haddii uu dhaco shil sunta nukleerka ah waana in la liqaa kaliya marka saraakiisha caafimaadka dadwaynuhu sidaas ku taliyaan.

**Maxaan u laqayaa kaniiniyada iodine ta?**

Marka uu dhaco shil nukleer ah, sunta iodine ta ayaa hawada ku faafi karta kadibna neefta dadka ayay raaci kartaa qanjirka thyroid marka neefta ay suntu ku jirto la jiido iyo/ama la liqo cunto iyo cabitaan suntu ku jirto. Kaniiniyada iodine ta waxay joojinayaan ku milmida sunta iodine ta xididka neef mareenka waxayna yaraynaysaa qaadista kansar ka dhasha qanjirka thyroid. Kaniiniyada iodine waxay kaliya kaa difaacayaa sunta iodine ta kaamana difaacayaa noocyada kale ee sunta nukleerka.

Talada lagu sheegaayo in kaniiniga la liqo waxaa badanaa la socota talo ku aadan inaan guriga lagasoo bixin ilaa laba maalmood. Sidaas awgeed waa muhiim inaad kaniiniga guriga dhigato.

**Goorma ayay tahay inaan liqo kaniiniyada?**

Waa inaad kaliya liqdaa kaniiniyada marka saraakiisha caafimaadka dadwaynuhu sidaas ku taliyaan. Marka shil nukleer ah dhaco, talo ayaa lagu bixin doonaa saxaafada, maamulada caafimaadka dadwaynaha ee ay qusayso iyo barta www.dsa.no.

### Qofkee laqaaya kaniiniyada iodine ta?

Si gaar ah ayay muhiim u tahay in carruurta iyo kurayda ka yar 18 sano iyo haweenka uurka leh iyo kuwa naaska nuujinaaya ay liqaan kaniiniyada waayo waxay khatarta ugu wayn ugu jiraan raadista kansarka qanjirka thyroid kadib markay uurkooda gasho sunta iodine. Marar gaar ah, waxaa sidoo kale haboon e dadka waawayn ee jira 18 ilaa 40 ay liqaan kaniiniyada. Dadka ka wayn 40 sano ayaan khatar wayn ugu jirin qaadista kansarka thyroid umana baahna inay liqaan kaniiniyada iodine. Qof kasta oo laga saaray qanjirka thyroid uma baahna inuu liqo kaniiniyada iodine.Saraakiisha caafimaadka dadwaynaha ayaa talo aad u faahfaahsan ka bixin doona kooxaha bulshada ee ay tahay inay liqaan kaniiniyada haddii shil nukleer ah dhaca.

> Fiiro gaar ah! Kaniiniyada iodine ee la adeegsanaayo marka uu dhaco shil nukleer waa inaan lagu qaldin kaniiniyada kaalmaatiga ah ee iodine. Waydii farmashiilahaaga talo haddii aad u baahan tahay kaniiniyada kaalmaatiga ah ee ay ku jirto maadada iodine, tusaale, intaad uurka leedahay.

**Waa maxay tirada kiniinka Kaliumjodid SERB (65 mg) ee ay tahay inaan qaato?**

**Qof kasta oo ka wayn da'da 12 sano jir, haweenka uurka leh iyo kuwa naaska nuujinaaya: 2 kiniini (= 130 mg)**

Kiniin waa in lagu laqaa biyo badan ama cabitaan kale. Haddii ay lama huraan tahay, kiniiniyada waa la calalin karaa, waa la kala qaybin karaa ama waa la burburin karaa oo waxaa lagu dhex laaqaa cabitaanka khudrada, jaamka, caanaha
ama wax kale oo lamid ah.

**Carruurta jira 3-12 sano jir: 1 kiniin (= 65 mg)**

Waa in lagu liqaa biyo badan ama dareerayaal kale. Haddii ay lama huraan tahay, kiniinka waa la calaalin karaa marka lakala qaybiyo oo waxaa lagu siin karaa qaado caano fadhi ah, jaamka ama cunto kale oo aan aadu adkayn, ama lagu laaqaa biyo.
Marka lagu laaqayo biyo, ku rid kiniinka koob oo ku dar biyo yar (wax yar oo ilmahu cabi karo) Walaaq ugu dhawaan 2 daqiiqo - kiniinka uguma milmi doono laakiin taasi waa wax fiican. Sii garoojada ilmaha iyo wax badan oo la cabbo intaa ka dib.

**Carruurta 1 bil-3 sano jirada ah: 1/2 kaniini (= 32.5 mg)**

Jebi kiniinka oo ka dhig labo jab. Sii ilmaha hal jab oo kaniiniga ah. Waa la calaalin karaa waana la burburin karaa waxaa lagu bixin karaa qaado caano fadhi ah,jaamka ama cunto kale oo aan aad u adkayn, ama waxaa lagu lqaa biyo.
Marka lagu laaqayo biyo: Ku rid hal jab oo kiniin ah koobka, kudar biyo yar kadibna qas ku dhawaad 2 daqiiqo. Kiniinku gabi ahaanba biyaha kuma milmi doonaan laakiin way fiican tahay. Sii ilmaha kiniinka iyo biyo badan oo la cabo intaa ka dib.

**Ilmaha kayar 1 bil: 1/4 kiniin (= 16.25 mg)**

U kala jabi kiniinka afar rubuc. Ku rid hal rubuc koob, ku dar biyo yar (qiyaastii 2-2.5 ml ama qaado shaah oo biyo ah ayaa ku filan) Walaaq ugu dhawaan 2 daqiiqo - kiniinku si buuxda uma milmi doono laakiin way fiican tahay. Sii garoojo ilmaha addoo isticmaalaya siriij ama qaado iyo, biyo badan oo la cabo intaa ka dib.

**Sii carruurta kuuro isku mid ah ayadoon laga eegayn in ilmuhu naaska nuugo iyo in kale.**

Waxaad u baahan doontaa: Siriijka kuurada lagu cabiro waxaad kasoo iibsan kartaa farmashiyaasha ama waxaad badalkooda isticmaali kartaa qaado.

Carruurtu caadi ahaan uma baahan doonaan in uu baaro dhakhtar kadib markay cunaan ayoodhiinta, laakiin waa inaad la hadashaa dhakhtarkaaga guud haddii aad wax shaki ah ka qabto caafimaadka ilmaha.
Tan waxaa sabab u ah inay jirto khatar yar oo kordhaysa ee falcelinta kimikaad ee jidhka gudahiisa oo ku yar ilmaha hadda dhashay (0-1 bil) ee la siiyo kiniinka ayoodhiinta. Carruurta ku dhasha dhicisnimada, kiniinka ayoodhiinta caadi ahaan laguma talinayo ilaa ay ka gudbaan todobaadka 37 ee uurka.

***Ha qaadan*** **kiniinada ayoodhiinta:**

- Haddii aad xasaasiyad ku qabto ayoodhiinta bootaasiyamka ama wax kala oo ku jira dawooyinka gudahooda (oo ku qoran gudaha warsidaha macluumaadka bukaanka).

**Qaado kiniinka ayoodhiinta laakiin la tasho dhakhtarkaaga ka dib:**

- Haddii aad qabto falcelinta kimikaad ee gudaha jidhka waa inaadeegtaa baadhitaankaaga falcelinta kimikaad ee gudaha jidhka 6-12 toddobaad kadib markaad qaadato daawada.
- Haddii aad uur leedahay oo qaad qabto falcelintsa kiimikaad gudaha jidhka, falcelintaada kimimaad waa in laga warhayaa muddada uurka, laga bilaabo 2 todobaad ka dib qaadashada ayoodhiinta.
- Haddii aad qabtid dermatitis herpetiformis (Cudurka Duhring) xaaladdaada maqaarku way ka sii xumaan kartaa ka dib markaad qaadato ayoodhiinta oo dhakhtarkaagu wuxuu u baahan karaa inuu hagaajiyo daaweyntaada.

Ma qabtaa wax su'aalo ah oo khuseeya kiniinka ayoodhiinta? Booqo www.dsa.no. Waxaad sidoo kale halkaan ka heli doontaa macluunaad ku qoran luqaddo kala duwan.